

Sharci lamba. 5 ee 3 Luulyo 1966
Wakiilashada Awooda Cafiiska iyosii Deynta

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA

Kadib markii la arkay oggolaanshaha Golaha Qaranka;

WAXAA LA SOO SAARAY

Qod. 1

Madaxweynaha Jamhuuriyadda waxaa loo igmaday in uu cafis guud bixiyo ee la xiriira dembiyada uu sharcigu u qondeeyey ciqaab aan ka badneyneyn ilaa 5 sano oo xarig ah, ama ciqaab lacageed ee dhan ilaa Sh.So. 10.000 (toban kun), ha ahaato ciqaab kaligeed taagan ama ay isla jiraan iyadoo aan la tixgelin marxaladaha ciqaabta kordhin ama nusqaamiya.

Qod. 2

Madaxweynaha Jamhuuriyadda waxaa loo igmada in uu bixiyo cafis ciqaabta dembiyada ilaa 7 sano ama ciqaab lacageed ilaa iyo Sh.So. 10.000 (toban kun) ama isku jirkood, iyo ciqaabta xarig ah iyo mid lacageed kadib markii laga reebo ciqaabaha xarigga iyo kuwa lacageed ee ciqaabaha maaliyeed.

Xukunka dilka waxaa lagu beddeley ciqaab xarig ah ilaa 30 (soddon sano), ciqaabta cimri daa'in iyo ciqaab kasta oo ka badan 27 (labaatan iyo todobo) sano waxaa lagu beddeley xarig ilaa 20 (labaatan) sano.

Ciqaabta la beddeley waxaa laga xisaabin doona maalinta xariga bilowday.

Qod. 3

Cafiska guud iyo cafiska lagu xusay qodobada sare ku xusan waxaa lagu dabaqi kara dembiyada la galay iyo ciqaabta lagu guddonsiyey ka hor maalinta hindisa sharcigaan la horgeeyey Golaha Qaranka.

Cafiska laguma dabaqi karo:

- a) dembiyada laga galo caalama iyo arrimaha gudaha ee Dowladda Somaliyeed sida u qoran Buugga 2aad, Cutubka 1, Madaxa 1aad iyo 2aad ee Xeerka Ciqaabta;
- b) Dembiyada ku qoran qodobada 241, 242, 243, 244, 245, 246, 249, 250, 251;
- c) Dembiyada lid ku ah anshaxa guud sida ku cad Buugga 2 Cutubka 9aad, Madaxa 3aad ee Xeerka Ciqaabta.

Cafis guud iyo cafiiska caadi ah waxaa loo ogolan kara kuwa dembiga ku noqnoqda oo keliya markii loola jeedo dembiyada kula kaca ah iyo ganaaxyada.

Qod. 4

Sharciga wuxuu hirgeli doona isla maalinta lagu soo daabacay Faafinta Rasmiga waxaana lagu keydin doona Keydka Rasmiga ee Shuruucda iyo Xeerarka ee Jamhuuriyadda Somalida.

Waxaa la faraaya cid kasto in ay u hoggansanaato sharci una hoggamiso cid kasta madama u yahay sharci dowli ah.

Muqdisho, 3 Luulyo 1966.

Aden Abdule Osman

Rai'sul Wasaaraha
Abdirizak Haji Hussein

Wasiirka Caddaladda iyo Arrimaha Diinta
Scek Hassan Abdullahi Farah